

Casharka 19

1. Yey ahaayeen dadkii dhashay Nuux dabadii?

-Waxay ahaayeen farcankaagii hore iyo farcankaygii.

2. Miyaa dadkayagu garanayeen Ilaah?

-Haa.

3. Sidee bay farcankeennii hore ku ogaadeen Ilaah?

-Markii kowaad, dadkoodii hore ayaa u sheegay kuwii ka dambeeyey wax ku saabsan Ilaah iyo daadkii weynaa.

4. Maxay dadkii hore kaga sheegeen faraci soo korayey Ilaah iyo daadkii weynaa?

-In Ilaah neceb yahay dembiga, oo uu burburiyey dadkii la noolaa Nuux, waxaan ka ahayn Nuux iyo qoyskiisii.

5. Sidee kale ayey farcankeennii hore wax kaga ogaadee Ilaah?

-Marka labaad, qaansaroobaadka ayaa farcankeennii hore wax uga sheegi jirtay Ilaah, waayo waxay dadka u ahayd Axdiga iyo Ilaah dhex-yaal.

6. Maxaa qaansaroobaadku Ilaah uga sheegi jirtay farcankeennii hore?

-Waxay ahayd calaamad u muujinaysa in Ilaah jecel yahay dadka, oo uusan kol dambe dunida daad ku halaagi doonin.

7. Sidee kale ayaa dadkieennii hore Ilaah ku garanayeen?

-Marka saddexaad, farcankeennii hore waxay Ilaah ku ogaan jireen markay ka fikirnaan waxyaalaha uu abuuray, sida buuraha, webiyada, iyo geedaha.

8. Maxaa cirka, buuraha, webiyada iyo geedahaba ay Ilaah ka bari kareen farcankeennii hore?

-In Ilaah Mid yahay, oo dadkuna ay tahay inay Ilaah oo keliya raacaan.

9. Miyaa badanaa kuwii aynu ka soo farcannay Ilaah rumaysnaayeen?

-Maya.

-Kuwo yar oo keliya ayaa rumaysnaa Ilaah.

10. Intii farcankeennu ay Ilaah raaci lahaayeen, yey ka doorteen Ilaah oo raaceen?

-Badankood waxay raaceen Shayddaanka iyo beentiisa.

11. Muxuu Shayddaanku u sheegay farcankeennii hore inay sameeyaan?

-Inay caabudaan qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha.

-Inay caabudaan ruuxyada.

-Inay caabudaan qoryo iyo dhagxaan ay samaysteen oo ay u ekaysiiyeen sida xayawaan oo kale.

12. Maxaa Ilaah uusan u doonaynin in dadku ay hal meel ku noolaadaan?

-Si aanay u illoobin Isaga, iyo si dunuubtoodu aanay u badan.

13. Maxay dadku minaaraddii dheerayd uga dhiseen Baable.

-Waayo dadku aad bay u kibreen.

-Waayo dadku waxay doonayeen inay magac samaysteen.

14. Markii dadku ay dhiseen munaarad dheer, miyaanu Ilaah arkin?

-Haa.

15. Miyaa Ilaah garanayaa fikirrada ku jira qalbiyada dadka oo dhan?

-Haa.

-Ka hor inta qofku uusan fikir qalbigiisa gelinin, Ilaah wuu wada garanayaa gebi ahaanba fikirradiisa soo socda.

16. Miyaa Ilaah garanayaa haallaa dadka dunida ay ku hadlaa oodhan?

-Haa.

-Ka hor inta qofku uusan hal kalmad ah oranin, Ilaah wuu wada garanayaa gebi ahaanba hadallada uu soo wado.

17. Miyaa Ilaah garanayaa falalka dadka oo dhan?

-Haa.

-Ka hor inta qofku uusan bilaabin inuu falal sameeyo, Ilaah wuu wada garanayaa waxa qofkaasu samaynayo gebi ahaan.

18. Miyaa Ilaah illoobaa dadka?

-Ilaah ma illoobo waxa dadku ku fikirayaan.

-Ilaah ma illoobo waxa dadku leeyihiin.

-Ilaah ma illoobo waxa dadku sameeyaan.

19. Maaddama faraceennii hore ay adeeci-waayeen Ilaah, ayaa Ilaah go'aan ku gaaray inuu ciqaab dusha ka saaro dadka.

Haddaba maxay ahayd ciqaabtii iLaah go'aansaday inuu dadka saaro?

-Ilaah wuxuu dadka siiyey luuqado badan si dadku ayan u awoodin in midba ka kale garto ama fahmo.

20. Kaddib markii Ilaah siiyey dadka oo dhan luuqado kala duwan, maxaa kale ee Ilaah sameeyey?

-Ilaah wuxuu dadkii ku kala yaaciyey meelo kala duwan ee dunida

ah.

21. Sidee baa farcankeennii hore ku soo gaareen meesha aynu imminka deggan nahay?

-Sannado badan kaddib, waxay ku soo gaareen lug, qaarna doonni baa keentay.

-Farcankeennii hore ee noolaa Nuux kaddib ayaa iyaguna Ilaah adeeci-waayey, waxaanay munnaarad dheer ka samaysteen Baabale.

-Waxaanay raaceen beentii Shayddaanka, balse ma ayan raacin runta Ilaah.

-Waxay raaceen jidadkooda, oo waxay diideen Ilaah.

-Inkastoo farcankeennii hore ay diideen Ilaah, miyaa Ilaah qorshiisii uu dadka ku badbaadinayey ka tanaasulay?

-Maya.

-Inkastoo farcankeennii hore ay Ilaah diideen, miyaa Ilaah ka takhalusay qorshihii uu ku soo diri lahaa Badbaadada?

-Maya.

-Markii Ilaah sheey ballan-qaado, Ilaah wuu dhowraa Ballankiisa.

-Markii ay Beer Ceeden joogeen, ayaa Ilaah Aadan iyo Xaawo ka ballanqaaday inuu u soo diri doono Badbaadiye.

-Ilaah ballankiisa ma jebiyo.

-Ilaah wuxuu ka ballanqaaday Seet iyo Enook iyo Nuux inuu u soo

diro Badbaadiye.

-Ilaah marnaba ma jebin doono ballankiisa.

-Inktoo kuwii aynu ka soo farcannay ay Ilaah diideen, haddana Ilaah kama bixin qorshihiisii ahaa inuu soo dirayo Badbaadiyaha.

-Inkastoo farcankeennii ay diideen Ilaah, Ilaah weli wuxuu doonayaa inuu Badbaadiyaha soo diro si uu dadka kaga badbaadiyyo dembiga.

-Inkastoo farcankeennii ay diideen Ilaah, Ilaah weli wuxuu doonayaa inuu Badbaadiyah soo diro si dadka uu uga badbaadiyo dhimashada.

-Inkastoo farcankeennii hore ay diideen Ilaah, Ilaah weli wuxuu doonayaa inuu badbaadiyaha soo diro si dadka uu kaga badbaadiyo Shayddaanka.

-Miyaa dadku istaajin karaan in Ilaah soo diro Badbaadiyaha?

-Maya.

-Miyaa jinniyadu, Ilaah ka istaajin karaan inuu soo diro badbaadiyaha?

-Maya.

-Miyaa Shayddaanku Ilaah ka istaajin karaa inuu soo diro Bdbaadiyaha?

-Maya.

-Yaa Ilaah ka istaajin kara inuu BAdbaadiyaha soo diro?

-Cidina Ilaah kama istaain karto qasdigiisa.

-Markii Ilaah goosto inuu soo diro badbaadiyaha, ninna Ilaah kama istaajin karo go'aankiisa.

-Maaddaama kuwo badan oo farcankeennii hore ah ay diideen Ilaah, Ilaah wuxuu go'aansaday inuu doorto hal nin, kaasoo farcankiisa uu ka soo daahiri doono BAdbaadiyaha.

-Magaca ninka Ilaah doortay waxaa la oran jiray Aabraam.

-Waa maxay sababta Ilaah u doortay Aabraan, kaasoo Badbaadiyuhu ka soo daahiri doonay?

-Miyaa Ilaah Aabraam u doortay inaanu Aabraam dembaabin awgeed?

-Maya.

-Aabraam wuxuu ahaa dembiile.

-Aabraam wuxuu ahaa mid ka soo farcamay Aadan.

-Aabraam wuxuu ku dhashay dembi.

-Maxaa Ilaah u doortay Aabraam?

-Aabraam wuxuu rumaystay in Ilaah qodus yahay.

-Aabraam wuxuu rumaystay inuu dembaabay.

-Aabraam wuxuu kaloo rumaystay in dembigiisii istaahilay dhimasho.

-Aabraam wuxuu rumaystay in Ilaah oo keliya awood u leeyahay inuu isaga badbaadiyo.

-Aabraam wuxuu kaloo rumaystay in Ilaah soo diri doono

Bdbaadiyaha.

-Maaddaama Aabraam rumaystay Ilaah, ayaa Ilaahna doortay in faraca badbaadiyaha la sood hex marsiiyo Aabraam.

-Aabraam aabbihiis waaa la oran jiray Terrax.

-Tarrax, wuxuu ka soo farcamay Saam.

-Miyaad xusuusataa magaca wiilashii Nuux?

-Saam, Xaam, iyo Yaafet.

-Aabraam wuxuu ka soo farcamay, mid ka mid ah wiilashii Nuux.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 11:27 & 29-30

27-Kuwanu waa faracii Terax. Terax wuxuud halay Aabraam, iyo Naaxoor, iyo Haaraan; Haraanna wuxuu dhalay Luut.

29-Aabraam iyo Naaxoorna way guursadeen: Aabraam naagtiisii waxaa la odhan jiray Saaray; naagtii Naaxoorna waxaa la odhan jiray Milkah, Waxayna ahayd gabadhii Haaraan, aabihii Milkah iyo Iskah.

30- Saarayna waxay ahayd madhalays; ilmona ma ay lahayn.

-Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Aabraam guursaday.

-Aabraam wuxuu guursaday haweenay la oran jiray Saaray.

-Welibana, Aabraam iyo Saaray, carruur ma lahayn.

-Maxaa Ibraahim iyo Saaray aanay carruur u lahayn?

-Waayo Saaray waxay ahayd gabar ma aan dhalin ama ma dhalays ah.

-Ibraahim iyo Saaray waxay ku noolaayeen magaaladii Ur.

-Dadkii degganaa Uur ma ayan rumaysnayn Ilaah iyo Runtiisa.

-Dadkii Uur waxay raaceen Shayddaanka iyo beentiisa.

-Dadkii Uur waxay ahaayeen qoomiyad shar leh.

-Maaddaama Aabraam weli ku noolaa Uur, Ilaah baa isaga u muuqday.

-Waxa ahoos ku qoran wixii Ilaah ku yiri Aabraam.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 12:1

1-Rabbigu wuxuu Aabraam ku yidhi, Ka tag waddankaaga, iyo xigaalkaaga, iyo reerka aabbahaaba, oo dalka aan ku tusi doono u kac.

-Maxaa Ilaah u sheegay Ibraahim inuu sameeyo?

-Ilaah wuxuu u sheegayaa Aabraam inuu ka tago waddankiisa, oo uu aado halka Ilaah ku hoggaamin doono.

-Waa maxay sababta Ilaah ugu leeyahay Aabraam, Ka tag waddankaaga, iyo magaalada Uur?

-Waayo dadka Uur ma ayan rumaysan Ilaah iyo runtiisa.

-Waayo dadkii Uur waay soo raaceen oo keliya Shaydaanka iyo beentiisa.

-Waayo Ilaah wuxuu doonayey inuu gooni u sooco quruum isaga rumaysata.

-Sidee baa Ilaah ula hadlay Aabraam?

-Ilaah codkiisa ayuu kula hadlay Aabraam.

-Ilaah wuxuu kula hadlay Aabraam codkiisa waayo weli markaas iyada ah kitaabka Ilaah lama qorin wakhtigii Ibraahim ku noolaa dunida.

-Sidee buu Ilaah maanta inoola hadlaa?

-Maanta, Ilaah sida badan inagulama hadlo codkiisa.

-Maanta, Ilaah sida badan wuxuu inagula hadlaa kitaabka Baybalka.

-Waxannu maqli karnaa hadalka Ilaah markii aynu akhrinno kitaabkiisa.

-Waxaan ka ogaan karnaa waxa Ilaah inagu leeyahay markii aynu akhrinno Hadallada ku qoran kitbkiisa.

-Markii Ilaah la hadlay Aabraam, Ilaah wuxuu ballanqaaday sheey.

-Wixii Ilaah ballanqaaday ayaa waxay ku qoran yihiin qidcada soo socoda.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 12:2

2-Oo quruun weyn baan kaa dhigi doonaa, oo waan ku barakadayn doonaa, magacaagana waan weynayn doonaa; oo waxaad noqon doontaa bamako.

-Maxaa Ilaah ka ballanqaaday Ibraahim?

-Marka ugu horraysa, Ilaah wuxuu Aabraam ka ballanqaaday inuu yeelan doono farac noqon doona quruun weyn.

-Wakhtigaas, ilaa iyo imisa carruur ah ayey lahaayeen Saarah iyo Aabraam?

-Wax carruur ah ma ayan lahayn.

-Maxaa Aabraam iyo Saaray ay carruur u dhali waayeen?

-Waayo Aabraam xaaskiisa Saaray waxay ahayd ma dhasho.

-Inkastoo Aabraam aanu carruur ama ubad lahayn, Ilaah wuxuu ballanqaaday in Ibraahim helayo farac isaga ka hara oo badan.

-Tan labaad, Ilaah wuxuu ballan-qaaday inuu Ibraahim barakadayn doono.

-Bal aynu idiin akhrinno waxa Ilaah ka ballanqaaday Aabraam.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 12:3

3-Rabbigu Wuxuu yiri, Oo waan barakadayn doonaa kuwa kuu duceeya, kan ku habaarana waan habaari doonaa; oo

qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan.

-Tan saddexaad, Ilaah wuxuu ballanqaaday in uu barakadayn doono mid waliba ee Ibraahim u duceeya, oo kii habaarana in la habaari doono.

-Tan saddexaad, Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu quruumaha oo dhan ku baradadayn doono mid ka imanaya faraca Ibraahim.

-Tan afraad, Ilaah wuxuu Ballanqaaday in quruumaha oo dhan uu ku barakadayn doono mid ka soo farcamay Ilaah.

-Ballanka ah in Ilaah ku barakadayn doono dunida mid ka soo farcamay Ibraahim, ayaa ah ballankii ugu weynaa ballammada.

-Waa kuma kan Ibraahim ka soo farcamaya, kaasoo qabiilooyinka oo dhanima ay ku barakoobi doonaan?

-Waa Badbaadiyaha.

-Maxaa Badbaadiyuhu samaynayaa?

-Badbaadiyuhu wuxuu u imanayaa inuu wiiqo awoodda dembiga.

-Badbaadiyuhu wuxuu u imanayaa inuu wiiqo awoodda dhimashada.

-Badbaadiyuhu wuxuu u imanayaa inuu wiiqo awoodda Shaydaanka.

-Badbaadiyuhu wuxuu u imanayaa inuu Ilaah iyo dadka isku keeno.

-Badbaadiyuhu wuxuu ka adkaanayaa Shaydaanka, oo wuxuu

barakadayn doonaa dadka dunida.

-Miyaa Ibraahim rumaystay ballamada Ilaah?

-Haa.

-Aabraam wuxuu rumaystay inaanu Ilaah been sheegaynin.

-Aabraam wuxuu rumaystay in Ilaah sheegayo runta oo keliya.

-Kaddib markii Ilaah ballan iyyey Aabraam, Maxaa Aabraam sameeyey?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 12:4-5

4-Markaasaa Aabraam tegey, sidii Rabbugu yidhi; Luutna wuu raacay. Aabraam shan iyo toddobaatan sannadood buu jiray markuu Haaraan ka tegey.

5-Aabraamna wuxuu kaxaystay naagtiisii Saaray, iyo Luut oo ahaa wiilkii walaalkiis iyo xoolahoodii ay urursadeen ood han, iyo dadkii ay Haaraan ka heleen oo dhan; kolkaasay u kaceen dalkii Kancaan, oo waxay yimaadeen dalkii Kancaan.

-Aabraam wuxuu ka tege dhulkii uu ku noolaa, oo wuxuu Ilaah u raacay waddankii Ilaah ku hogaaminayey.

-Halkee baa Ilaah ku hoggaamiyey Aabraam?

-Ilaah wuxuu Aabraam ku hoggaamiyey dhul cusub oo la yiraahdo Kancaan.

-Casharka soo socda, waxaannu ku baranaynaa wax ku saabsan waxa ku dhacay Aabraam intii uu joogay dhulkii Kancaan.